

# Catholic Immigration Centre



address: 219 Argyle Avenue  
Ottawa ON K2P 2H4

phone: 613-232-9634

fax: 613-232-3660

website: [www.cic.ca](http://www.cic.ca)

email: [cic@cic.ca](mailto:cic@cic.ca)

Catholic Immigration Centre waa hay'ad samafal ah oo dadka muhaajiriinta ah u fidisa adeegyo lacag la'aan ah iyadoo aan lagu kala soocayn midabkooda, isirkooda, diintooda, da'dooda, ama inay yihiin lab ama dheddig.

Waxay hay'addu leedahay shaqaale ku hadla afaf kala duwan oo dadka ka caawiya xagga tarjumaadda, kuna hagaajya xafiisyada iyo adeegyada ay u baahan yihiin sida caafimaadka, guriyeenta, gargaarka maaliyadda, sharciga, xannaanada caruurta, waxbarashada iyo shaqada. Waxay kaloo Hay'addu dadka ka caawisa hawlaha la xiriira kafaalaqaadka (sponsorship) iyo codsiga qaxootiga.

Waxaan diyaar u nahay inaan kaa kaalmeeyno xagga helitaanka adeegyada aad u baahan tahay iyo buuxinta foomamka haddad dhib kala kulantid. Waxaan kaloo diyaar u nahay inaan si niyad sam ah kuula xallino wixii mashaakil ah oo aad qabtid qofahaan ama qoys ahaan. Wax kasta oo xog ah ood na siisidna waxay ahaanayaan kuwa dhowrsan oo qarsoodi ah.

Waxa keliya oo loo baahan yahay waa adigoo na soo waca sacadaha 9:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo maalmaha Isniinta ilaa Jimcaha ama xafiiska yimaada. Looma baahna ballan. Qof shaqaale ah ayaa mar kasta diyaar u ah inuu ku caawiyo. Telefonkayagu waa (613) 232-9634. Cinwaankayagu waa: 219 Argyle Avenue, Dabaqa shanaad. Ku soo dhawoow.